



Fariintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Oktoobar 13, 2022

Ku socota: Xubnaha bulshada I/DD iyo hawl wadaagayaasha Qabiilka

Ka socota: Fariborz Pakseresht, Agaasimaha ODHS, iyo Liesl Wendt,

Agaamisa Ku-xigeenka ODHS

Ujeedada: Agaasimaha ku meel gaarka ah ee ODDS oo lagu dhawaaqay

Waxaanu ku faraxsanahay in aanu idinla wadaagno in Anna Lansky ay oggolaaday in ay u shaqeyso agaasimaha ku meel gaarka ee Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ahaan. Anna waxay ka shaqeyn doontaa doorkani ilaa laga gaarayo kalfadhiga sharci-dejinta ee 2023 ilaa agaasime joogto ah laga shaqaaleysiinayo. Agaasimaha ODDS Lilia Teninty ayaa bixin doonta taageero ilaa Noofambar 10.

Anna ayaa ku soo biirtay Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) iyada oo ah agaamisa ku-xigeenka ODDS sanadkii 2015. Iyada oo la shaqeynaysa Lilia, kooxda maamulka iyo shaqaalaha ee ODDS, Anna waxay gacan ka geysatay dejinta iyo hirgelinta aragti istiraatiijiyadeed oo loogu talagalay barnaamijyada iyo adeegyada Oregon oo loogu talagalay dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD). Anna ayaa kor kala socotay siyaasada ODDS iyo maamulka Medicaid. Waxay soo hoggaamisay qorshayaal istiraatiijiyadeed oo badan oo ay ku jiraan Compass Project, Blueprint Project iyo qorshayaasha adeega sinnaanshaha. Waxay soo taageertay ODDS iyada oo la adeegsanayo horumarinta miisaaniyada, fadhigada sharci-dejinta iyo heshiiska gorgortanka lagu galay. Anna waa xubin ka mid ah aasaasayaasha Kooxda Ilaha Shaqaalaha ee ODHS Slavic waxayna ODDS u soo matashay Guddiga Oregon ee loogu talagalay Naafanimada Koriinka.

Ka hor intii aysan imaan ODDS, Anna waxay u soo shaqaysay oo soo ahayd kaaliyaha agaasimaha Qaybta Adeegyada Naafanimada (DDS). Waxay ka bilowday Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Arkansas sanadkii 2005,

iyada oo ka soo shaqeysay wanaajinta nidaamka ganacsiga iyo dejinta qoondeynta kharashka iyo nidaamyada maaliyadeed ee tooska ah. Waxay soo hoggaamisay mashaariicda waaxda oo dhan ee ka tirsan Xafiiska Siyaasada iyo Qorshaynta, oo ay ku jiraan dadaalada dib u habeynta daryeelka caafimaadka. Ka dib noqoshadii kaaliyaha agaasimaha DDS sanadkii 2012, Anna waxay soo hoggaamisay dadaalada lagu wanaajinayo adeegyada ku saleysan guriga iyo bulshada ee loogu talagalay dadka qaba I/DD, oo ay ku jiraan Barnaamijka Community First Choice, Health Homes iyo Qorshaha Horumarinta Lacag bixinta.

Waxaan nasiib u yeelanay in aanu haysano hoggaamiye istiraatiijiyadeed ee Anna oo leh awood, khibrad iyo xirfada qabashada hoggaanka ODDS inaga oo galayna fadhiga sharci-dejinta. Toddobadii sano ee ay ahayd agaasime ku-xigeenka, Anna waxay ka soo shaqeysay iskaashi lala yeesho kooxda maamulka iyo shaqaalaha ee ODDS si loogu daro [Equity North Star](#), in ay ku lug yeeshaan bulshada I/DD iyo wanaajinta sida ODDS ugu adeegto dadka reer Oregon taasi oo ah hab qofka ku saleysan oo wax awood siinaya. Siyaasadeeda iyo khibradeeda Medicaid, gaar ahaan inta lagu jiro cudurka baahsan ee COVID-19, waxay si wanaagsan ugu adeegi doonaan bulshada I/DD iyada oo ODHS ay isku diyaarinayso dabcinta xaalada caafimaad ee degdega ah ee dadweynaha ee federaalka.

Waxaanu yeelan doonaa macluumaad dheeraad ah dhawaaan oo ku saabsan nidaamka shaqaaleysiinta oo loogu talagalay agaasimaha ODDS oo joogto ah. Muhiimadayada koowaad waa helitaanka hoggaamiye ku habboon ODDS, ODHS iyo dadka aan u adeegno. Iyada oo la haysto hoggaaminta Anna iyo kooxda adag ee maamulka iyo shaqaalaha ee ODDS, waxaanu haysanaa wakhtiga lagama maarmaanka ah si aan u gaarno go'aanka shaqaaleysiinta saxda ah.

Si Daacadnimo leh,

Fariborz Pakseresht, Agaasimaha ODHS  
Liesl Wendt, Agaamisa Ku-xigeenka ODHS

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena .*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).